Region Gävleborg
Smittskydd

September 2025

**Waanu idin salaamaynaa!**
Wakhti dhow waxaa iman doona in la qaato tallaalkii covid-19 iyo kii hargabka. Waxaanu rabnaa in aanu ku siino macluumaad muhiim ah oo ku saabsan tallaalada.

Tallaalladu waxay dadka ka ilaalinayaan cudurrada faafa waxayna ka mid yihiin tallaabooyinka ugu waxtarka badan ee caafimaadka bulshada—waxaa ka horeeya oo keliya biyaha nadiifta ah. Cudurro badan oo horey uga jiray Iswiidhan hadda si weyn ayaa loo yareeyey sababtoo ah dad badan ayaa iska tallaalay (ila wareed ka yimid: Hey'adda caafimaadka dadweynaha).

Covid-19 iyo hargabku si fudud ayey u faafaan waxayna sababi karaan qandho, qufac iyo jir xanuun. Dadka gaar ka mid ah, jirrooyinku waxay ku noqon karaan kuwo halis ah. Markaad iska tallaasho, waxaad yaraynaysaa halista cudurka khatar ah – tallaalku wuxuu badbaadiyaa nolosha.

**Nafdaada ilaali dayrtan - tallaalada ka hortagga covid-19 iyo hargabka**

- **75 sano ama ka weyn**? Waxaa lagugula talinayaa inaad iska tallaasho covid-19 iyo hargabka. **Dhawaan: 14 oktoobar**
- **65-74 sano?** Waxaa lagugula talinayaa inaad iska tallaasho hargabka. **Dhawaan: 4 noofambar** Tallaalka covid-19 waxaa qofka la siiyaa haddii uu qofku ka tirsan yahay kooxda khatarta ku jirta oo keliya.
- **Ma qabtaa KOL, macaan, cudurka wadnaha** (ma dhiig kar oo keliya) **ama arrin kale oo halis ah oo kuu keeni kara inuu cudur khatar ahi kugu dhaco?** Waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato labada tallaalba. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka akhrisan kartaa bogga 1177.se/Gavleborg.
- **Qofka uurka leh 12 usbuuc kadib**? Waxaa lagugula talinayaa tallaalka hargabka. **Dhawaan: 4 noofambar**
  Tallaalku wuxuu idin difaacayaa adiga iyo ilmaha labadiinaba.

**Sida aad u qaadanayso tallaalka:**
- Waqtiga ballan ka samayso adiga oo isticmaalaya Bank-ID ama elektaroonigaaga aqoonsi.
- Iska kaalay adiga oo aab ballan qabsan (drop-in-vacinationn).
- Soo qaado kaarkaaga aqoonsiga oo shaqaynay.

Dhammaan macluumaadka ku saabsan tallaallada (luqadda Iswiidhishka) 1177.se/Gavleborg

**Soo dhawow!**

Waxaa idin salaamaya,
Shah Jalal, smittskyddsläkare, Region Gävleborg
Maria Nordström, vaccinsamordnare, Region Gävleborg